

Febraayo 2017



Saaxiibbadayada qaaliga ahow,

Sannado badan ayaan anigu la taliye u ahaa lamaanayaasha is qaba ee guurkooda iyo qoysaskooda ugu baahan talo iyo duco. Waxaan ogaadey inay dhibaatooyin badani la soo gudboonaan karaan guurka, oo ay erayo yar oo dhiirigelin ah oo keliyahi guurka dhibaataysan u noqon karaan sidii biyo qabow oo wax bogsiiinaya.

Inta aynu hore u sii socono oo aynu u gudbeyno TWR Dumarka Rajada, u fiirso in calaamadda hay'adayadu ay muujinayso sida ay qalbiyadeenu isula xidhiidhsan yihiin oo ay Ilaahayna ugu xidhan yihiin. Kitaabka Yexesqeel 36:26, waxaynu ka akhriinaa nebiga oo inoo sheegaya inuu Ilaahay inaga saari doono "qalbiyada dhagaxa ah" oo ina siin doono "qalbiyo cusub."

Guurarku, waxay mararka qaarkood u muuqan kartaa inaynu isula dhaqano sidii dad qalbiyo dhagax ah leh oo kale. Guurka wanaagsani wuxuu qaataa waxkhti iyo feejignaan dheeraad ah. Dagaal ayaa ku socda guurkaaga kaas oo aan ahayn ka sida dadka aan Ilaahay aqoon oo kale. Badanaa, marka guurarkeena dhibaato ka hor timaado, waxaynu u qaadanaa in lamaanahaheenu cadowga yahay. Waa jiraa cadow dhab ahi, laakiinse kaasi maaha lamaanahaaga ama carruurtaada.

Waxaan maanta idinku dhiirigelinayaa inaydaan keli ku ahayn caqabadaha guurarkiina soo wajaha. Waxaan idinku dhiirigelinayaa inuu Ilaahay og yahay xaaladaha aad ku jirtaan iyo inay caawimaadi jirto. Xaaladuhu ma sahlana, laakiinse Ilaahay marna ma foga inuu gabaad iyo caawimaad idiin noqdo wakhtiyada dhibaataada iyo baahida (Sabuuradii 46:1).

Ha joojin inaad sii wadid dadaalka aad ugu jirtid guurkaaga. Sii wad inaad la ducaysatid haweenka kale oo Ilaahay u gee caqabadaha iyo dhibaatooyinka guurkaaga soo foodsaara. Ilaahay u dhiib qalbi-xanuunkaaga iyo xanaaqaaga, cuqdadaada iyo saamaxaad la'aantaada. Rumayso inuu jiro Ilaah ku jecel oo arki kara xaalada aad ku jirtid. Dhiiranow oo dadka aad la ducaysatid u sheeg caqabadaha ku haysta, dabadeedna kuwaas Ilaahay duco ugu gee, adoo rumaysan inuu Isagu ducooyinkeena maqlo oo uu u dhow yahay kuwa qalbiga jaban (Sabuuradii 34:18). Ka xorow inay kugu sii jirto cuqdad ama cadho, oo Ilaahay u oggolow inuu guurkaaga iyo iyo qoyskaaga maamulo.

Ducadu adkaysi ayay ina siinaysaa. Gacmaha ayaa is qabsan karnaa oo Ilaahay ayaanu guurarkeena iyo qoysaskeena ugu qayshan karnaa, innaga oo rumaysan inaynu u adeegno Ilaah doonaya inay guurarkeena iyo qoysaskeenu magaciisa amaan u soo jiidi karaan, taas oo keenaysa inay dadka kalena Ciise Masiix u yimaadaan.

Ha niyad jabin oo ha is dhiibin! Indhaha ku hay Ciise; diyaar buu u yahay inuu adiga iyo guurkaaga caawiyo. Waan kuu soo ducaynayaa maanta!

Qalbiga Ilaahay ha ammaano!

Peggy Banks,
Global Ministry Director
TWR Women of Hope/Project Hannah